# PPS Wararkii U Dambeeyey ee Xanuunka Coronavirus: Maarso 18

Waalidiinta iyo Shaqaalaha PPS ee Qaaliga ah,

Waxa aanu jecelnahay in aan sii wadno in aan idin soo gaadhsiino wararkii iyo xogtii ugu dambeeysay. Waxa aan ka shaqeyneynaa habeen iyo maalin sidii aan u soo gaarsiin lahayn lahaa waxbarashadii iyo taageerida shucuu bulsheedka sidoo kale in ay ardaydu helaan cunto inta ay iskuulada degmada oo dhami xiran yihiin, taasi oo Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown ay ku xirtay amar wareegto, iyada oo xiritaan la dheereyey ilaa bisha Abriil 28keeda.

- **Qeybinta Cuntada & Casharo Waxbarasho La Diyaariyey:** Muddo ku siman labo maalmood, waxa aan qaybinay n ka badan 7,000 cunto oo la siiyey ardayda iyada oo laga qaybiyey 15 goobood. Waxaad wixii macluumaad ee ku saabsan cuntadayada ka heli kartaan halkan pps.net/coronavirus. Fadln waxaad ogaataan in dhammaan ardayda PPS iyo ilmo kasta ama dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 1 sano ilaa 18 sanno in ay iman karayaan goob kasta oo ka mid ah goobahaasi cuntada lagu qeybinayo iyaga oo ka qaadan kara. Goobahaasi cuntada lagu qeybinayo ardayda iyo waalidiintoodu sidoo kale waxa ay ka heli karaan shaqaale ka caawiya cinwaanada haddii ay u baahan yihiin caafimaadka maskaxda, waxaa kale oo la siinayaa turjubaano caawiya iyo waxaa idin diyaara casharo waxbarasho oo la diyaariyey iyo waliba buug aad guryaha u qaadataan si caruurtiinu u akhristaan. Waxa aan sidoo kale ku kordhineynaa casharo dijital ah iyo agabyo waxbarasho oo kale shabakadayada maalin kasta.
- **Ma U Baahan Tihiin Kumbuyuutar:** Waxa aan idiin soo dirnay qoysaska **sahan** maanta aan ku ogaaneyno **cida u baahan in ay dugsiyada ka daysanto kumbuyuutarka dhabta(laptop) ama qalab kale,** inta iskuuladu ay xiran yihiin sidii looga taageeri lahaa waxbarashadooda. Waxa kale oo aan jecelnahay in aan qoysasku **soo sheegaan in internet haysataan.** Waxaan rajeyneynaa in aad maanta hesheen sahankii, haddii aydaan helin, waxaad ka heli kartaan halkani.
- **Waxbarasho Ku Salaysan Guriga:** Dhammaadka todobaadkani, waxa aan rajeyneynaa haddii aad tihiin waalidiinta iyo macalimiintu in aad naga heli doontaan macluumaad ku saabsan sidii aan u qorsheyneyno in aad heshaan casharo online ah iyo manhajkii inta lagu jiro fasaxa gu'ga. Waxa aan bilaabneynaa in aan la shaqeyno macalimiintayadu sidii ay ardayda u siin lahaayeen ardayda dariiqooyin fiican ay ardayga iyo macalinku is arki karaan iyaga oo la siinayo casharadii ay fasaladooda ku qaadan jireen iyo mid kale inta waqtigani lagu gudo jiro. Fadlan la soco wixii tallooyin ah ee ku saabsan sidii aan ugu taageri lahayn casharo ku salaysan guriga ilmahaaga.
- **Nadiifinta Iskuulka:** Shaqaalaheena nadaafadu waxa ka shaqeynayaan iskuul kasta oo ka mid ah iskuulada PPS iyaga oo waliba caawinaya sidii iskuulada u gaadhsiin lahaayeen cuntada ardayda la siinayo. Iyaga iyo shaqaalaha farsamada iyo waliba kooxda bakhaaradu waxa ay calanka u sidaan sidii aan u xaqiijin lahayn in arday kasta iyo xubin kasta oo shaqaalaha ka mid ahi ay ugu soo noqon lahayn iskuulada iyaga oo aad loo nadiifiyey, nabadgelyo ah,iyo dhismayaasheenii oo lagu shaqeyn karayo.

Fadlan waxaad ogaataan in hoggaamiyaasha degmadu in ay la shaqeynayaan Waaxda Waxbarashada Oregon, iyaga oo abuuraya tallooyin nidaamka iskuulada, si aan caddeyn uga bixino su'aalaha ku jawaabaha ku saabsan meelmarinta Amarkii Wareegtada lagu dhawaaqay dhawaan sidoo kalena in la abuuro sidii looga jawaabi lahaa su'aalo fara badan oo muhiim iyada oo ka warqabno ardayda iyo qoysasku in qabaan waqtigani. Waxaan ka mid ah:

- *Sidee ayuu iskuulada la xiray raad ugu yeelanayaan ardayda dugsiyada sare iyo shuruudaha looga baahan yahay jabintooda?*
- *Waxa aan ahay shaqaalaha hawlaha degdega ah ama daryeele caafimaad kaasi oo bixiya addeegyo muhiim Magaalaada Portland, waa maxay daryeelka xannaanada caruurta ee aan u heli karaa ilmaheyga,*
- *Sidee ayuu raad ugu yeelanayaa xidhitaanka iskuulku jadwal taariikheedkii iskuulada? Miyaa la soo bogi maalmaha ardayda ka luntay inta iskuulku xiran?*
- *Miyaa dugsiyada degmadu wali rajeynayaan in la qaado SBAC iyo imtixaanadii kale ee Gobolku ku waajibiyey in ay ardaydu qaataan?*
- *Waa maxay fursadaha ay ilmahayga ama ardaygeygu ay kula xiriiri karaan macalimiintooda inta iskuuladu ay xiran yihiin ?*
- *Waa maxay raadka uu ku yeelanayo magdhowga kooxaha shaqaalaheena cid kasta oo ka mid ah?*

Waxaa jira su'aalo fara badan oo muunad ah oo aan uga raadineyno caddeymo madaxda gobolka iyo Golaha Waxbarashada Gobolka oo u baahn sidii ay tixgalin u siin lahaayeen. Waxa aan sameyn doonaa sidii bulshadayada guud ahaan ay u noqon lahaayeen kuwa warqab ah xogta khuseysa sida ugu dhakhso badan ay na soo gaadhaan. Waxa aan sidoo kale idiin soo gudbin doonaa dukementi FAQ (Su'aalaha Inta Badan La Isweydiin Karo) oo laga heli karo shabakadayada sidii aan uga jawaabo ugua bixin lahayn su'aalahaasi faraha badan

Mar labaad, in lagu celceliyo ayaa muhiin ah: waxaan idinku dhiirigelineynaa qof kasta oo ka mid ah bulshadeenu **inuu sii wado in uu raaco tallo soo jeedintii fiicneyd** oo ay ka mid tahay in aad ka fogaato meelaha dadku ku soo ururaan, si joogta oo gacmaha loo dhaqo, iyo in marka la qufacayo adka la daboolo ama la hindhisayo. Haddii aad isku aragto calaamadaha hargabka ama ifilada guryihiina iska jooga ilaa calaamadahaasi idinka tagayaan muddo ku siman 72 saacadood. Haddii aad ka walaacdo astaamahaasi, fadlan waxaad la tashataa takhtar.

Waxa aan idiinka mahadcelineynaa fahamkiina waqtigan aan xaalada adag ku jirno. Qalalaasahani wuxuu u baahan yahay inaan u shaqeyno si ka gedisan sidii aan markii hore u shaqeyn jirnay. Higsigayagu wuxuu yahay in aan kor u qaadno watigii waxbarashada iyada oo aan yaraneyno in hakad ku yimaado waxbarashadii.

Waxa aan idiin rajeynaynaa qoys ahaan nabadgelyo iyo caafimaad iyo fayo qabka todobaadkani iyo mar kastaba.

Dr. Kregg Cuellar, Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, Waxbarashada iyo Bulshooyinka Iskuulada
Claire Hertz, Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, Shaqooyinka & Hawlgalada